



Hawlgalka Degitaanka iyo kaalmada Gudbidda (SETS)

ISBEDDELKA ADEEGYADA COVID-19 DARTEED

Kaalmada hoos timaada Hawlgelinta Degitaanka iyo Kaalmada Gudbidda waa soconaysaa si ay u helaan macaamiishu inta lagu jiro faafka COVID-19. Si kasta ha ahaatee, sida adeegyadaas loo bixiyo waa laga yaabaa inay isbedelaan sida waafaqsan talada sarkaalka caafimaadka.

Dhawaan, bixiyayaal badan ayaa caawimaya macaamiisha iyaga oo isticmaalaya telefoon ama online-ka. Xaaladaha qaarkood, adeegbixiyayaashu waxay arki karaan macaamiil wajahaya arrimo degdeg ah amahaddii adeegyadu aanay dhici karin.

Adeegbixiyayaalku waxay heli karaan adeegyada tarjumidda telefoonka kuwaas oo aan ku hadlin Ingiriis fiican.

Baro wixii ku saabsan [COVID-19 iyo astaameheeda](#).

Waa maxay Barnaamijka SETS?

Hawlgelinta Degitaanka Kaalmada Gudbidda (SETS) waa barnaamij qaran oo wax looga qabanayo baahida degidda soogalootiga xaqa u leh. Waxaa la raba barnaamijka in lagu wanaajiyo ka qaybgelidda dhaqaale iyo bulsho uuna caawimo isku xirnaanta bulshada.

Waxaa jira laba qaybood oo barnaamijka:

- *SETS – Adeegga macmiiluhu* wuxuu siiyaa macaamiisha macluumaadka la xiriira degitaanka, talada, u doodidda, iyo caawimada si loo helo adeegyada ku lugta leh.
- *SETS – (Community Capacity Building)* Dhisidda Awoodda Bulshadu wuxuu caawimaa soo bixintaanka kooxo bulsho iyo ururo kaalmeeya bulshadooda si loo xaqiijiyo degitaan wax ku oola in loo dhiso waqtiga fog.

Adeegyadee ayaa SETS bixiyaa?

Bixiyayaasha SETS way ku caawimi karaan iyaga oo ku siinaya macluumaad iyo talo arrimo badan oo ku jira waxbarashada iyo tababarka, u sahlidda helidda Ingiriis iyo helidda adeegyo luqadeed, shaqo, guriyeyn, caafimaad iyo kaalmo bulsho, gaadiid, ka qaybgalka bulsho iyo arrimaha sharciga.

Noocyada xarakaadka waxaa ka mid noqon kara tusaale ahaan, kooxaha shaqada guri, barnaamijyada tababarka wadidda, kooxaha la socodka caafimaadka dumarka, fursadaha barashada Ingiriiska wada sheekaysiga, koorsooyinka u diyaargarawga shaqada kuwaas oo ay ku jiraan sida shaqo looga helo Australia, xirfadaha shaqo raadinta iyo qoritaanka taariikhda shaqada iyo waxbarashada.

Caawimo ayaa la siin karaa kooxaha bulshada iyo hogaamiyayaasha jaalliyadaha si looga caawimo jaalliyadaada.

Adeeg Bixiyayaasha ayaa awooda inay kuu gudbiyaan adeegyo kale si ay kaaga caawimaan xaallad kasta oo ku haysata.

Xaq ma u leeyahay in aan helo adeegyadaan?

SETS – Xarakaadka Adeegyada Macmiilaha ayaa la siiyaa soogalootiga shanta sano oo ugu horraysa ee Australia kaatagoriya soo socda:

- Dadka ku soo galay habka aadamiga
- Soogalooti qoys ku tirsan oo heerkiisa Ingiriisku hooseeyo
- Ku tiirsane soogalooti xirfad leh ee meelaha ka baxsan magaaloyinka waaweyn oo ingiriiskiisu hooseeyo
- Degane ku meel gaara oo la xushay (gabar ama wiilal iyo isu doonan oo qof haysto fiiso iyo ku tiirsanayaashooda) goobaha magaalada ka baxsan oo Ingiriiskoodu hooseeyso.

SETS – Bartilmaameedka Dhisidda Awoodda Bulshada cusub iyo qawmiyadaha soo kordhaya:

- Jaalliyadaha, hogaamiyayaasha bulshada iyo wakiilada bulshada soo koraysa, iyo
- Ururada leh awood xadadan oo hay'adeed.

Sidee ku ogaadaa wixii ku saabsan adeegyada SETS?

Si aad u ogaato bixiyaha SETS ee agtaada ah fadlan gal [halkan](#) ka dibna liiska ka fiiri linkiga adeegbixiyayaasha. Markaad hesho bixiyaha agtaada ah, fadlan ka baar internet-ka sida ugu fiican oo loola xiriiri karo websaytkooda.